| | Xeerka Gudigga<br><br>**Ku Meeleynta Ardayga ee Dugsiyada Xaafada** | **4.10.045-P** |
|---|---|---|

## I. Hor-u-dhac

A. U jeedada Ku meeleynta Ardayga ee Xeerka Dugsiyada Xaafadaha waa:

1. In la aasaaso hanaan loogu meeleeyo ardayda dugsi xaafadeedka
2. In la bixiyo xeer-hagid joogto ah oo ku saabsan isbeddelada xuduudaha dugsiga

B. Guddigu wuxuu qirayaa oo qiimeeyaa xasilloonida dugsi xaafadeedka; hase yeeshe, wuxuu kaloo aqoonsan yahay baahida loo qabo in la ilaaliyo dabacsanaan lagu hagaajiyo xuduudaha dugsiyada xaafadaha iyadoo laga falcelinayo isbeddelada ka dhaca bulshada oo dhan.

## II. Qeexitaano

A. "Dugsiga xaafada" waa dugsi u adeega aagga ka qeybgalka loogu tallogalay.

B. "Kormeerayo dadka weyn" waxaa loola jeedaa qof weyn oo ku jiro xiriirka waalidka sida eraygaas loogu qeexay ORS Cutubka 339.

C. "Da'yar madax banaani la siiyay" waxaa loola jeedaa qof ay maxkamaduhu ku dhawaaqday xoriyadiisa iyadoo la raacayo ORS Cutubka 419B ama qaanuunka lamidka ah ee ka baxsan gobolka.

D. “xuduuda dugsiga” waxa loola jeedaa xadka jireed ee qeexaya aaggaga loogu talagalay goobta laga soo aadayo dugsi xaafadeedka.

E. "Habka gudbinta" waa Qaab loogu qorsheeyay ardayda inay iskaga kala gudbaan koox-fasal dugsiyeed.

F. "Walaalo" waa carruurta leh isla waalid ama uu isla kormeero qof weyni hal goobna ku wada nool.

## III. Tilmaamaha Ku meelaynta Ardayga Dugsiga Xaafada

A. Dhammaan ardayda fasalada K-12 waxaa lagu meeleeyaa dugsiga xaafada iyadoo lagu saleynayo cinwaanka:

1. Goobta ardaygu uu la nool yahay waalid ama kormeere qaangaar ah
2. Goobta uu ilmaha madax banaanida la siiyay uu degan yahay

B. Ardaydu waxay xaq u leeyihiin inay dhigtaan dugsiyada xaafadooda ilaa heerka ugu sareeya, marka laga reebo sida lagu sheegay qaybta III.D ee xeerkan.

C. Ardayda dooratay inay dhigtaan dugsi aan ahayn dugsiga xaafadooda ayagoo adeegsanaya beddelasho la oggolaaday waxay xaq u leeyihiin inay ku laabtaan dugsiga xaafadooda, sida lagu sheegay Nidaamka Isqorista iyo Beddelka Ardayda (4.10.051-P).

D. Meelaynta ardayga ee adeegyada barnaamijyada khaaska ah, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn Waxbarashada Gaarka ah, Ingiriisiga oo ah Luuqadda Labaad iyo Waxbarashada Beddelka ah (Xulashooyinka Waxbarashada), ayaa laga yaabaa inay beddesho meelaynta dugsi xaafadeedka ah.

## IV. Dib-u-eegista Meelaynta Ardayda iyo Hannaanka Isbeddelka Xuduuda

A. Kormeeraha guud ama wakiilka waa inuu si joogto ah ula socdaa isqorista, baahida barnaamij iyo isbeddelada juqraafiga si loo saadaaliyo baahida loo qabo isbeddelada xuduudaha dugsiyada oo ay tixgeliyaan xulashooyinka kale ee suurtogalka ah.

B. Haddii kormeeraha guud ama wakiilku go'aamiyo inay jiraan xaaalado keenaya beddelka xuduud dugsiyeedka, Kormeeraha guud waa inuu u jeediyaa Guddiga tallooyin:

1. Ku biirinaysa taloloyinka qoysaska, ardayda, shaqaalaha iyo xubnaha bulshada

2. Tixgelinaysa arrimaha keenaya wanaag u isticmaalidda xuduuda dugsiga, ilaa xadka ugu macquulsan. Guddigu wuxuu aqoonsan yahay in arrimahaas oo kale ay is khilaafsanaan karaan, oo ay kamid yihiin, laakiin aan ku xadidneyn, liistada hoose ee aan mudnaanta la siinin:

   a) Qaabka gudbidda ee oggolaada ardayda ugu badan ee suurtogalka ah inay si wadajir ah heer dugsi uga guuraan kuna biirana mid kale

   b) Tirokoobka ardayda:

   c) Xuduudaha ishaysta oo kor u qaadaya dariiqyada aaminka ah ee dugsiyada iyo dareenka bulshada sidoo kale aqoonsada waxna ka qabta caqabadaha dabiiciga ah iyo kuwa aadanahu sameeyay

   d) Sida ugu habboon u adeegsiga xarumaha

   e) Xasilloonida barnaamijka iyo isqorista ee dugsiyada ku ag xeeran

   f) Ku xaddidda saameynta isbeddelada xuduuda tirada ugu yar ee ardayda ee suurtogalka ah

C. Guddiga waa inuu yeeshaa ansixinta kama dambaysta ah ee beddelida xuduud dugsiyeedka, iyadoo niyaddu tahay in dhammaan isbeddelada sannad dugsiyeedka soo socdo loo la ansixiyaa ugu dambayn jannaayo jadwal sanadeedka.

## V. Meelaynta Ardayga Kadib Isbeddelka Xuduuda

A. Si kor loogu qaado sii wadidda iyo xasilloonida ardayda iyo qoysaskooda marka laga reebo sida lagu sheegay Qaybta V.B:

1. Ardayda ku nool xaafada loo oggolaaday xuduud beddelka waxay sii dhigan karaan dugsigooda hadda illaa fasalka ugu sareeya
2. Walaalaha da'da yar ee ku nool xaafad loo ansixiyay beddelka xuduuda waxay leeyihiin damaanad iyada oo loo marayo nidaamka beddelida si ay u xaadiraan dugsigii hore ee xaafada haddii walaal ka weyn uu hadda dhigto oo uu sannad dugsiyeedka soo socdana dhigan doono dugsiga hore ee xaafada.
3. Ardayda beddelaada ee dhigto dugsi xuduud laga beddelayo waxay sii dhigan karaan dugsigooda hadda illaa fasalkooga ugu sareeya.

B. Xaaladaha isbeddelada xuduud dugsiyeedka si loo yareeyo buux-dhaafka ama ujeedada aasaasida xuduud dugsiyeed cusub, Kormeeraha guud ama Guddiga waxay ku talin karaan ka-reebanaanta Qaybta V.A. Ka-reebitaannada noocaas ah waa inay ansixiyaan Guddigu.

## VI. Ka Reebbitaanada iyo Hirgelinada

A. Xeerkan ma khuseeyo:

1. Xiritaanka ku meelgaarka ah ee dugsi kasta oo dib-u-cusboonaysiin ama dib-u-habeyn lagu sameynayo markaana ardayda si ku meelgaar ah loogu wareejiyo xarun kale
2. Xiritaanka ama isbeddelka adeegsiga dhisme kasta ama xaruun kale oo ay leedahay Degmadu oo aan hadda loogu adeegsan ujeeddooyin waxbarasho
3. Xiritaanka dugsi kasta illaa hal sanno sababo xaaladaha degdegga ah awgeed, oo ay ku jiraan dhibaatooyin waaweyn oo la xiriira xarunta ama deegaanka

B. Kormeeraha guud waa inuu dejiyaa ammaro maamul iyo habraacyada lagu dhaqangelinayo xeerkan hadba sida loogu baahdo.

Tixraacyada Sharciga: ORS 339.133; ORS Cutubka 419B; 4.10.051-P; 6.10.022-P

Taariikhda: La qaatay 6/23/08